

Bixiye – Sida loo Istimmaalo Fob

Ujeeddada: Hagahaan wuxuu bixiyaa tilmaameyaal tillabo-tillaabo ah oo loogu tala galay bixiyeyaasha adeegsanaya aaladda fob si ay u diiwaan galiyaan waqtigooda shaqada OR PTC DCI.

Natijada: Bixiyaha ayaa si habboon u diiwaan galiyay waqtigiisa galitaannada OR PTC DCI asagoo isticmaalaya aalada fob.

Haddii si sax ah loo raaco, dhammaan galitaannada waqtiga ayaa waafaqaya EVV.

Linkiyada:

Xaashiyaha waqtiga ee fob (waa khiyaari) [Ingiriis](#), [Carabic – عربى](#), [Farsi - فارسى](#), [Khmer \(Cambodian\) - ខ្មែរ](#), [Korean - 한국어](#), [Lao - ລາວ](#), [Nepali - नेपाली](#), [Romanian – Română](#), [Af Ruush – Русский](#), [Af Shiineys Fudud 简体中文](#), [Somali - Soomaali](#), [Spanish – Español](#), [Af Shiineyskii Soo Jireenka ahaa 傳統漢語](#), [Vietnamese - Tiếng Việt](#)

Xaashiyaha waqtiga ee Fob waxaa sidoo kale laga heli karaa Xafiiska Deegaankaaga.

Talaabooyinka lagu dhamaystirayo habraaca:

#	Tilmaan	Sawir shaashadda/Linkiga shaqeynaya
1.	Bilowga kol-shaqeedkaaga, qor taariikhda iyo waqtiga aad bilaabeyso intaa kadibna riix batoonka korontada ee cas ee ku dul yaala fob-ka.	 <div style="border: 1px solid #ccc; padding: 10px; background-color: #fff;"> <p>Ogsonow: Haddii bixiyeyaa badan ay u wada shaqeeyaan isla hal macmiil, kulligood waxay isticmaali doonaan hal fob. Fobs-ka waxaa loo qoondeeyay macmiilkha waxaana macmiil qoondo u heli karaa un hal fob ee wax ka badan ma heli karo.</p> </div>

Bixiye – Sida loo Isticmaalo Fob

2.	<p>Koodh ka kooban lix (6) jifar aaya soo muuqan doona. Ku qor xaashidaada waqtiga ee fob koodhkaan fob ama meeshii kale ee aad ku diiwaan galinayso waqtigaaga.</p>	
3.	Ku celi tillaaboo yinka Kowaad (1) iyo Labaad (2) dhammaadka kol-shaheedkaaga.	
4.	<p>Dhib miyaad la kulantay? Ka eeg Talooyin ku saabsan Cilladbixin dhammaadka dukumiintigaan.</p> <p>Ka hor taariikhda kama dambaysta ah ee soo gudbinta qarashka ee loogu tala galay waqtiga qarash bixinta ee labada asbuuc ah, waa inaad galisaa xogta kol-shaheedkaaga Boortalka Webka OR PTC DCI si loo bixiyo.</p> <p>Fur browser-ka webka ee ku yaala aalada adigoo isticmaalaya internet. Tani waa aalad ah kobuyuutar desktop ah ama laptop, ama aalad casri ah, sida tablet ama taleefanka casriga ah.</p> <p>Gal Boortalka Webka OR PTC DCI: orptc.dcisoftware.com</p>	
5.	Guji "Add Entry"	

Bixiye – Sida loo Isticmaalo Fob

Foomka 'Kudar Gelitaan Cusub' ayaa soo muuqan doona. U buuxi foomka sida soo socota:

- 6.A **Nooca Galitaanka:** Cod ayaa daarmaya ah "Punch"
- 6.B **Magaca Shaqaalaha:** Si otomaatig ah ayey u buuxisaa magaca bixiyaha
- 6.C **Nooga Koontada Bogga:** xulo Saacadle
- 6.D **Macmiilka:** Qor magacaaga macmiilka oo guji magaca si aad u buuxiso
- 6.E **Koodhka adeega:** Koodhka adeegga isu buuxinta si ootamaatig ah
- 6.F **Taariikh Adeeg:** Gali taariikhda kol-shaqeedka
- 6.G **Baaqi soo haray:** Waxaa soo baxaya saacadaha lagu ogolaaday waqtiga mushaar bixinta
- 6.H **Soo gelidda:** Qor waqtiga bilowga kol-shaqeedka
- 6.I **Ka bax Shaqada:** Qor waqtiga dhammaadka kol-shaqeedkaaga

The screenshot shows a form titled 'Kudar Gelitaan Cusub'. The fields and their corresponding labels are:

- 6.A Nooca Gelitaanka: * Saacada
- 6.B Magaca Shaqaalaha: Lula ViaSpiga
- 6.C Nooca Akoonka: * Saacaddii
- 6.D Macaamil: * Ranger Danger - KPY4571F
- 6.E Koodhka Adeegga: * Hourly ADL/IADL-1
- 6.F Taariikhda Adeegga: * 01/18/2024
- 6.G Qeybta Hartay: 30
- 6.H Is xaadiri: * 15:48
- 6.I Kabaxid: * 15:59

Ogsonow: Meesha lagu qoro soo gelidda ama ka bixida kol-shaqeedkaaga waxay leedahay liis hoos u dhaca oo muujinaya waqtiga nusu saaca ah. Si aad u qorto waqtiga saxda ah ee aad bilowday iyo kan aad dhammaysay kol-shaqeedkaaga, saar kaasarka meesha lagu qoro waqtiga oo tir waqtigii soo baxayo oo qor waqtiga bilowga iyo waqtiga dhammaadka. Xasuusnoow kudaridda AM ama PM.

The screenshot shows another part of the form with the following fields and their corresponding labels:

- 6.J Habka EVV: * Aminiga FOB
- 6.K Tikidhka Bilow: * 463442
- 6.L Dhammaadka Token: * 085138
- 6.M Taariikhda Kabixida: * 01/18/2024

Bixiye – Sida loo Isticmaalo Fob

- | | |
|-----|---|
| 6.J | Habka EVV: Xulo ‘FOB Sugan’ |
| 6.K | Tokenka Bilowga: Gali koodhka fob bilowga kol-shaqeedkaaga |
| 6.L | Tokenka Dhammaadka: Qor koodhka fob dhammaadka kol-shaqeedkaaga |
| 6.M | Taariikhda Ka bixidda Shaqada:
Isabuuxinta taariikhda si ootamaatig ah
Koodhka Qeexitaanka Cudurada: Ficil looma baahna
Qoraalada: Ikhtiyaar ah
Lifaaq: Ikhtiyaar ah |
| 6.N | Caddeyn: Calaamadee sanduuqa caddeyn. Markii aad gujiso sanduuqaas waxaad sidaa ku xaqiijisay “Waqtigu inuu saxan yahay. Been haddii aad qorto waxay taasi ku noqon kartaa Xatooyo Medicaid”
Caddeyn oo buuxda ayaa laga arki karaa shaashada markii la galo. |
| | Guji ‘Keydi’ |
| 7. | Digniin ayaa soo muuqan doonta taasoo oranaysa “Ma hubtaa inaad rabto inaad faalo cusub aad ku darto”. |
| 8. | Guji ‘Haa’. |

Koodhka Baarista : Koodhka Baarista


Qoraalada: Kudat Qoraal loogu talagalay Saacadaha-shaqo

Lifaaq: Choose File

Qoraalada: *

Time is correct. Falsifying may be Medicaid fraud

Jooji Keydso




Bixiye – Sida loo Isticmaalo Fob

Cilladbixin:

Waxaan riixay batoonka, laakiin nambarka ayaa qarsoomay durba kahor intii aanan qorin!

Waxay leedahay fob waqtii xisaabiye gudaheeda kujira. Waxaa uu kasoo muuqdaa dhanka bidix ee nambarada sidii asagoo ah layman (eeg sawirka hoose). Markii la riixo batoonka cas, xisaabiyaha waqtiga ayaa soo baxaya laymankuna way qarsoomayaan markii waqtigu dhammaado. Haddii aad riixdo batoonka cas ee bilaabida ayna muuqanayaan hal ama labo layn, xisaabiyaha waqtiga daa ha iska socdee oo muuqdaha ha baaba'o. Riix batoonka cas ee bilaabida mar kale waxaana soo bixidoona koodh cusub oo leh waqtii badan oo aad ku qorto koodhka.



Waxaan si khalaad ah u riixay batoonka in ka badan hal jeer!

Haddii aad riixdo batoonka mar kale, koodh fob oo cusub ayaa soo baxaya. Koodhadhkii fob ee horay usoo baxay mar kale masoo muuqanayaan markii ay qarsoomaan. Qor koodhka fob ee cusub ee soo baxaya.

Waxaan galiiyay macluumaadkeyga oo dhan daaqada ku magacaaban “Add New Entry”, waxayna sheegeysaa in tokens-ku aysan isu ekeyn!

Waa macquul inaad qortay koodh fob oo khaldan ama inaad waqtiga u qortay si khaldan. Foomka ayaa soo saaraya waqtii nusu saac ah (30 daqiico). Saar kaasarka sanduuqa soo gelidda iyo ka bixidda kol-shaheedkaaga oo tir waqtigii soo baxay oo gali waqtiga saxda ah ee aad soo xaadirtay iyo kan aad ka baxday kol-shaheedka, xasuusnoowna inaad ku darto AM ama PM waqtiga. (*Tusaale 1:16 pm*)

Haddii taasi shaqeyn weydo, ka baddal “Habka EVV” “FOB Sugan” oo u baddal “Kabixidda Boortalka” si aad u abuurto faallo hore.

Waxaan raacay tillaabooinka cilladbixinta walina dhib ayaa iga heysta fob!

Fadlan keen fob-ka Xafiiska Deegaankaaga si lagaaga caawiyo. Waxay eegi doonaan fob-ka si ay bal u arkaan inay u shaqeyneyso si sax ah mid kale ayanya kuugu baddalayaan haddii loo baahdo.